Shuruudaha Kiraysiga

Homes for Islington

improving housing through partnership

Tusmo

1 Mas'uuliyadaha – Dayactirada iyo Gacan ku haynta 2

2 La tashi 3

3 Lacagta kirada.....3

4 Joojinta Kiraysiga 3

5 U xilsaarid, La wareegid, Sii kirayn iyo Qol kiraystayaal……4

6 Dad farabadnaan Sharciga la xidhiidha 4

7 Ku noolaanta Hantida 4

8 Daryeelidda Hantida.....4

9 Isticmaalidda Hantida 5

10 Qashin Qubista 5

11 Gelitaanka.....5

12 Dhaqamada bulshada Dhibka ku ah.....6

13 Xayawaanada rabbaayadda ah 7

14 Waxyaalaha Holca 7

15 Baabuur dhigashada 7

16 Xuquuqaha Jidka 7

17 Adeegga Ogaysiisyada 8

18 Ogaysiinta dayactirka 8

Lifaaq 1.....8

Shuruudaha Kiraysiga

Marka aad saxeexdo heshiiskaaga kiraysiga waxaad aqbalaysaa inaad tahay kirasyste Islington Council iyo inaad u hogaansanto shuruudahaas. Waxaad gelaysaa heshiis sharci ah.

Kani waa dukumeenti sharci ah oo muhiim ah, oo kuu sharaxaya xuquuqahaaga sharciga ah iyo mas'uuliyadaha adigoo ah kirayste maamulka degmada (council-ka) ah, iyo sababaha uu kiraysigaagu ku joogsan/dhamaan karo.

Fadlan u akhri heshiiska kiraysiga iyo shuruudahan si qoto-dheer, kuna hay meel badbaado ah. Haddii aadan raacin shuruudahaas, waxaa laga yaabaa inaad weydo hantidaada. Wixii warbixino dheeraad ah fadlan la xidhiidh xafiiska guryaha ee agagaarkaaga ama eeg buuggaaga kiraysiga.

Shuruudaha soo socdaa waxay khuseeyaan kiraystayaasha hantiyaha maamulka degmada (council-ka).

Waxaad haysataa kiraysi sugan oo hoos yimaada Sharciga Guryaha ee 1985 (hadda wixii ka dambeeya waxaa loogu yeedhayaa Sharciga).

Waxaad xaq u leedahay inaad ku noolaato hantida, maamulka degmaduna (council-ka) faragelin kugu samayn maayo illaa inaad jebiso wax ka mid ah shuruudahaas mooyee.

Maamulka degmada (council-ka) waxay keliya oo guriga kaa saari karaan iyagoo isticmaalaya Amar Maxkamadeed, haddii ay jiraan sababo la xidhiidha Sharciga oo ku lug leh dib-ula noqosho gurigaaga ah. Sababahaasi waxaa laga heli karaa oo ay ku lifaaqan yihiin shuruudahaan kiraysiga, lifaaqa 1.

1. Mas'uuliyadaha- Dayactirada iyo Gacan ku haynta

Maamulka degmada (council-ka) wuxuu mas'uul ka yahay waxyaalaha soo socda.

Inay dayactiraan qaab-dhismeedka iyo dhinaca dibadda ee hantida, oo ay ku jiraan;

- Derbiyadda dibadda, albaabada dibadda, qolofyada iyo rukumada daaqaddaha ee dibadda;
- Tuubooyinka wasakhda, majaroorada, tuubooyinka dibadda;
- Wadooyinka la maro iyo jaranjarooyinka hantiyaha u gaarka ah;
- Saqafka iyo tuubooyinka qiiqa (laakiin aan ahayn xaaqid);
- Qaab-dhismeedka gudaha; iyo
- Qurxinaha dibadda.

Dayactir ku samaynta iyo habsami u shaqaynta:

- Ku rakibidda siinta biyo, gaas, koronto, iyo wasakh ka saaridda (laakiin aan ahayn siinta adeegyada ay ku jiraan cabirayaasha gaasta iyo korontada, kuwaas oo ah mas'uuliyaddaha adeeg bixiyaha aad doorato);
- Ku rakibidda qol iyo biyo kulaylin ay soo geliyeen maamulka degmada (council-ka); iyo
- Wiishashka, meelaha qashinka lagu guro, iyo laydhadhka la wadaago ee dhismaha ama dabaqa ay hantidu qayb ka tahay.

Waxaad mas'uul ka tahay waxyaalaha soo socda.

Gacan ku haynta iyo dayactirka hantida gudaheeda oo ay ku jiraan:

- albaabada gudaha;
- muraayadaha gudaha;
- waxyaalaha ku rakiban gudaha, oo ay ku jiraan alwaaxyada derbiga salkiisa, qolofyada albaabada iyo daaqaddaha, khasabadaha saxanka qubayska, fadhiyada musqusha, daboolada lagu gufeeyo iyo silsiladaha iyo saxanka qubayska, biraha iyo maryaha daahyada;
- qurxinaha gudaha iyo salaaxidda;
- dayactirada albaabada iyo khaanadaha qaybaha kijada;
- daloolka warqaddaha laga soo tuuro;
- shay'yada adiga ama qoyskaaga ama dadka ku soo booqday waxyeeleeyeen;
- dayactirada hagaajinahaaga;
- bedelidda khasabaddaha biyaha iyo ku rakibidda tuubooyinka ee qasaaladda , mishiinka weelka dhaqa iyo wixii noocaas ah;
- bedelidda madaxyada nalalka iyo laydhadhka dhaadheer; iyo
- bedelidda qafilada ama bedelidda furayaasha. Waxaad aaladaha furayaasha amaanka ka heli kartaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga, laakiin waa inaad lacag ka bixisaa. Waxaanu hubinaa inaan la isticmaali karin aalad fure amaan oo lumay.

Haddii aad samayn weydo dayactiro mas'uuliyadaada ah oo samayn la'aanta dayactiradaasi ay saamayn ku yeelanayso xaaladda hantidaada ama hanti kuu dhow, maamulka degmada (council-ka) waxaa kaga yaabaa inay doortaan inay sameeyaan dayactiradaas. Haddii tani dhacdo maamulka degmada (council-ka) waxaa laga yaabaa inay kugu soo dalacaan kharashka ku baxa dayactiradaas.

Hagaajin

Haddii maamulka degmada (council-ka) uu sameeyo dayactiro ama hagaajino la xidhiidha waxyeelooyin ama qurxino hantida ah ama gudaheeda, waxay bixinayaan deeq ah hagaajinata waxyeelada ama qurxinahaas. Tani waxay keliya oo khusaysaa meelaha gaarka ah ee hantida ama qayb qol ka mid ah ee ay arintaasi saamaysay.

Shaqooyinka waaweyn

Haddii maamulka degmada (council-ka) go'aansado in ay shaqooyin waaweyni lama huraan yihiin, aanayna macquul ahayn in la sameeyo inta aad weli ku nooshahay hantida gudaheeda, maamulka degmada (council-ka) waxay ku siin doonaan ogaysiis qoraal ah oo ah inaad u baahan tahay inaad guurto. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad si ku meel gaadh ama si toos/rasmi ah u guurto.

Haddii aad diido inaad aqbasho soo bandhig ah inaad u guurto deegaan ku meel gaadh ah ama deegaan kale, ka dib markii soo bandhig noocaas ah oo munaasib ah laguu sameeyey, diiditaankaaga waxaa loo arki doonaa inuu yahay mid jebinaya heshiiskaagii kiraysiga.

2. La tashi

ka hor inta aan wax laga bedelin heshiiskan, maamulka degmada (council-ka) wuxuu kaala tashan doonaa wixii ku saabsan isbedel walba oo la soo jeediyey, wuxuuna kaga fiirsan doonaa waxa aad soo jeediso wakhti macquul ah. Markaa ka dibna way kuu soo sheegi doonaan isbedelka lacagta kiradaada, qiimayaasha, kharashyada ama lacag bixinaha kale ama adeegyada uu bixiyo maamulka degmada (council-ka).

3. Lacagta Kirada

- Waxaanu ku siinay faahfaahin lacagta kirada iyo kharashyada kale ah (sida kharashka biyaha) ee aad u baahan tahay inaad bixiso. Kuwaa waa inaad isbuuc walba bixisaa, adigoo Isniin walba ama ka hor bixinaya lacagta isbuuca soo socda. Haddii aad u baahan tahay inaad tan wax ka bedesho, waa in xafiiska guryaha ee agagaarkaaga tan ogolaadaa.
- Maamulka degmada (council-ka) wuu bedeli karaa lacagta kiradaada iyo kharashyada kale, isagoo ku siinaya ogaysiis qoraal ah oo afar isbuuc ka hor ah. Ogaysiisku wuxuu ku siinaya taariikhda uu isbedelku ka bilaabanayo. Maamulka degmada (council-ka) wuxuu ku siinayaa ogaysiis hal isbuuc oo keliya ah wixii isbedelada la xidhiidha kharashyada geerashka, xerada baabuurka iyo meesha baabuurka la dhigto ah.
- Haddii aad bixin weydo lacagta kiradaada ama kharashyada kale waxaa laga yaabaa inaad gurigaaga weydo. Fadlan kala xidhiidh xafiiska guryaha ee agagaarkaaga wixii caawimo iyo talobixin ah.
- Waa inaad sidoo kale bixisaa kharash kasta oo kiro ama dayn lagaaga leeyahay guryo hore oo aad ka deganayn Islington Council ama aad liisan ka haysatey. Maamulka degmada (council-ka) wuxuu kaala gorgortami doonaa qorshayaal lacag bixineed.
- Maamulka degmada (council-ka) waxaa laga yaabaa inuu ula dhaqmo wixii lacag ah ee aad ku leedahay inay ku bixiyaan kirada, deymanka ama kharshyada kale ee lagugu leeyahay.

4. Joojinra kiraysiga

- Waa inaad u joojisaa kiraysiga adigoo siimaya xafiiska guryaha ee agagaarkaaga siinaya ogaysiis qoraal ah oo afar ubuuc ka hor ah. Kiraysigu wuxuu dhamaanayaa Isniinta ah ama ku xigta marka uu ogaysiiska afarta isbuuc ahi dhamaado. Marka kiis kiraysi wadajir ah,

haddii mid bixiyo ogaysiis, ogaysiiska ayaa joojinaya kiraysiga dhamaantood, haday ogolaansho bixiyaan kiraystayaasha kale iyo haddii kaleba.

- Waa inaad bixisaa dhamaan lacagta kirada iyo kharashyada illaa wakhtigaas ay kiraysigaagu dhamaanayso ah.
- Waa inaad hantida ka madhisaa dhamaan waxyaalaha aad adigu leedahay, hubisaana in aan cidi joogin hantida gudaheeda. Waa inaad dhamaan furayaasha ku soo celisaa xafiiska guryaha ee agagaarkaaga ugu dambayn 12 duhurnimo ee Isniinta ku xigta marka uu kiraysigaagu dhamaado. Haddii aadan sidaa samayn, waa inaad bixisaa lacagta kirada iyo kharashyada kale ee hore loo soo sheegay. Waa inaad sidoo kale haddana raacdaa shuruudaha kale ee kiraysigaaga.
- Waa inaad hantida kaga tagtaa xaalad nadiif ah, qaadataa dhamaan waxyaalaha aad leedahay iyo xayawaankaaga rabbaayadda ah, wixii qashin ah oo dhana ka qaadaa hantida (oo ay ku jirto xadiiqad guriga ku dhegan, hadii ay jirto). Maamulka degmada (council-ka) wuxuu u qaadanayaa inaadan doonayn waxkasta oo aad ka tagto, wuuna ka takhalusi doonaa. Maamulka degmada (council-ka) wuxuu ku weydiin doonaa inaad bixiso kharashka ku baxa meel dhigida ama ka takhalusidda wixii alaabtaada ah ee aad ka tagto.
- Waa inaad hantida iyo waxyaalaha maamulka degmada (council-ka) ee ku xidhxidhan iyo ku rakiban uga tagtaa si nadiif ah iyo xaalad dayactir oo wanaagsan, sidii uu ahaa markii ay bilaabatay kiraysigu. Hase yeeshee mas'uul kama tihid sii xumaanta/duugoobista ah goog'o iyo dildilaac iskii isaga yimi.
- Maamulka degmada (council-ka) wuxuu ku weydiin doonaa inaad bixiso kharashka kaga baxa dayactirida wax waxyeelo ah oo hantida ah, oo ay sababtay adiga oo aan hantida si macquul ah u isticmaalin.

5. U xil saarid, La wareegid, Sii kirayn iyo Qol kiraystayaal.

- U xilsaaridda (assignment) waxaa macnaheedu yahay ku cid kale ku wareejinta kiraysigaaga. Waxaa loo yaqaanaa 'la wareegid' ('succession') marka ay dhacdo sababta oo ah in kiraystihii dhintay. U xilsaaridda iyo la wareegidda waxay dhici karaan wakhti xaaladdo kooban oo keliya, kuwaas oo uu ogolaado Sharciga Guryaha ee 1985 markaas keliya laftooda oo ogolaanshona laga helo maamulka degmada (council-ka). Faahfaahino ayaa laga heli karaa xafiiskaaga guryaha ama Buugga Kiraystaha.
- Ka sii kirayn macnaheedu waa, inaad ka kirayso qof kale, ama ka tanaasulidda lahaanshaha qayb ka mid ah hantida. Ma sii kirayn kartid ama kama tanaasuli kartid hantida oo **dhan.**
- Waxaad qaadan kartaa qol-kiraystayaal aad ka qaado kharash kiro oo macquul ah.
- Ma sii kirayn kartid, bedelan kartid kiraysiga, ama kama tanaasuli kartid qayb hantida ka mid ah illaa aad maamulka degmada (council-ka) ka hesho ogolaansho qoraal ah, kaas oo aan loo diidi doonin si aan macquul ahayn.
- Marka aad dalbanayso ogolaansho sii kirayn, ama haddii aad doonayso inaad qaadato qol-kiraystayaal, waa inaad maamulka degmada (council-ka) u sheegtaa:
  a). magaca, da'da iyo jinsiga qofka la soo jeedinayo inuu noqdo sii-kirayste ama qol-kirayste;
  b). faahfaahin ah wixii cuntooyin ah ama adeegyo kale ee aad bixinayso; iyo
  c). lacag kiro ama lacag qol-kiraysi oo intee ah ayaad ka qaadi doontaa. Haddii maamulka degmadu (council-ka) ku weydiiyo waa inaad bil gudaheed kirada ugu gudbisaa Golaha Qiimaynta Lacagaha kirada(Gudi-maxkamadeedka Lacagaha kirada).

6. Dad-farabadnaanta Sharciga la xidhiidha

Waa inaadan hantida dadka uga buuxin si sharcidaro ku ah qodobada 324-328 and 330-331 ee Sharciga. Waa inaad maamulka degmada (council-ka) soo ogaysiisaa cid kasta oo gurigaaga ku soo biirta, tusaale ahaan, wixii ilme ah ee dhashay ka dib markii ay bilaabatay guri-kiraysigu. Haddii dad kale kugu soo biiraan, si toos ah loogu aqbali maayo inay yihiin xubin guriga si joogto ah uga tirsan, oo qayb ka ah kiraysigaaga. Wixii warbixino dheeraad ah, fadlan la xidhiidh xafiiska guryaha ee agagaarkaaga.

7. Ku noolaanshaha hantida

waa inaad hantida ugu noolaataa inay tahay gurigaaga ama kani uugu mihiimsan.

Waa inaad:

maamulka degmada (council-ka) u sheegtaa haddii aad doonayso inaad hantida ka maqnaato

- wax ka badan hal bil; iyo
- aadna ogolaansho ka heshaa maamulka degmada (council-ka) inaadan hantida ku noolaan wax ka badan saddex bolood.

Labaad xaaladdoodba waa inaad maamulka degmada

(council-ka) ugu sheegtaa qoraal ahaan:

- taariikhda aad doonayso inaad tagto.
- taariikhda aad doonayso inaad soo noqoto.
- qorshayaasha aad u samaysay bixinta lacagta kirada iyo daryeelka hantida; iyo
- cinwaanka iyo lambarka telefoonka ee maamulka degmada (council-ka) kaala soo xidhiidhi karaan.

8. Daryeelidda Hantida

Waa inaad:

- daryeesho hantida, oo ay ku jiraan waxyaalaha ku xidhan iyo kuwa ku rakiban ee maamulka degmada (council-ka), aadna hubisaa in dadka ku soo booqda iyo dadka kale ee isticmaalaya ama ku nool hantida ay sidaas oo kale sameeyaan;
- ku haysaa hantida iyo wax kasto oo ah xadiiqad ama meel la wadaago inay ahaato mid nadiif ah oo nadaamsan, aadana sababin ama ogolaan wax nadaam daro ah ama nadaafad la'aan ah oo ah hantida gudaheeda ama dhismaha;
- ku haysaa hantida si qurxin macquul ah oo wanaagsan;
- ugu sheegtaa maamulka degmada (council-ka), sida ugu dhakhsaha badan ee macquul ah wixii dhibaato ah ee uu maamulka degmada (council-ka) mas'uuliyaddeeda leeyahay;
- dib u siisaa maamulka degmada (council-ka) kharashka dayactir walba ama bedelid walba oo hantida ama dhismaha lagu sameeyey oo ka timi dayacid, iska xil saarid la'aan ama si xun u isticmaalid aad adiga, qof kale oo gurigaaga ka tirsan ama qof hantida ama dhismaha soo booqday sameeyey; iyo
- dhawaaqa hoos loogu dhigo sidii macquula ah (lagu goglo sagxadaha hantida kaarbedyo ama googol dhulka la dhigo oo kale oo munaasib ah).

Waa inaad samaysaa, sababtaa ama ogolaataa:

a). wax ka bedelid, wax ku darid ama hagaajino hantida lagu sameeyo, waxyaalaha ku xidhxidhan ama ku rakiban ama adeegyada hantida loo sameeyo;

b). eryal ama saxan satelayt in lagu xidho hantida banaankeeda;

c). qurxin hantida oo dibadda ah; ama

d). ku rakibidda hantida sagxad dhulka ah oo ah waxyaalo layslu dhedhejiye.

Haddii aad doonayso inaad samayso shaqooyinka noocan ah, waa inaad weydiisataa maamulka degmada (council-ka) ogolaansho qoraal ah. Ogolaanshaha uma diidi doono si aan macquul ahayn.

Waa inaad sidoo kale heshaa wixii ansixin ah ee loo baahan yahay, sida ogolaansho qorshe ama ansixin ah sharciyada dhisidda.

Wax ka bedelid walba oo la ogolaaday oo hantida lagu sameeyo, waa in lagu dhamaystiro wakhti iyo heer shaqo-qabad macquul ah, iyo si wafaqsan shuruudaha kale ee ku qoran ogolaanshaha maamulka degmada (council-ka).

Maamulka degmada (council-ka) kama masuul aha wixii luma, waxyeelo soo gaadho ee ah wax ka bedelaad uu kiraystuhu sameeyo haddii uu ogolaansho qoraal ah ka helo maamulka degmada (council-ka) iyo haddii kaleba.

Dhamaan shaqooyinka korontada ee laga qabto dhismaha, marka laga reebo shaqooyinka yaryar ee lagu qoray Sharciyada Korontada, Janaayo 2005, waa in uu rakibaa korantiiste aqoon leh, waana inuu haysataa shahaado u hogaansan sida ay dhigayaan Sharciyada Korontada (BS7671).

Haddii maamulka degmada (council-ka) uu fasax kuu siiyo saxan setalayt ama eeryal in laguu rakibo, waxaa laga filayaa inaad tan adigu ka qaado, oo kharashkeeda bixiso si aad noogu ogolaato inaanu samayno dayactiro loo baahan yahay ama hawlo hagaajin ah oo hantida lagu sameeyo. Haddii aad sidaa samayn weydo anaga ayaa ka qaadayna, waxaana laga yaabaa inaanu kugu soo dalacno lacagta ku baxda.

Cadiyan ogolaansho lama siiyo in kiraystaha ku nool dabaqyada ay dhigaan sagxad looxa-dhulka (illaa inay hantidu tahay dabaqa dhulka mooyee).

9. Isticmaalidda Hantida

Waa inaad:

- u isticmaasho meelaha la wadaago, wiishashka iyo adeegyada si macquul ah, aadna hubiso in dadka ku nool hantidaada iyo dadka ku soo booqanaya iyo martidaadu sidaas oo kale sameeyaan.
- qurxisaa gurugaaga gudihiisa oo aad sagxadaha, derbiyada, waxyaalaha ku dhegan iyo kuwa ku xidhan saqafka ku haysaa xaalad macquul ah.
- ku haysaa wax kasta oo ah xadiiqad gaar ah ama meelaha kale ee gaarka ah inay ahaadaan kuwo nadaamsan oo nadiif ka ah qashin iyo caws aad ugu baxa.
- hubisaa in gurigaagu yahay nadiif si aanu dhibaato ugu keenin deriska.

Waa inaadan, u isticmaalin ama sababin ama ogolaan in qayb ka mid ah hantida ama dabaqa loo isticmaalo arimo ka baxsan deganaanshaha (tusaale, in lagu sameeyo ganacsi dayactir baabuur) ogolaansho qoraal ah oo laga helo maamulka degmada (council-ka) la'aanteed. Tan macnaheedu waa in:

a). ay tahay inaad deegaankaaga nolosha u isticmaasho ku noolaansho;

b). ay tahay inaad geerashka u isticmaasho dhigista gaadhigaaga oo keliya; iyo

c). ay tahay inaad bakhaarka u isticmaasho inaad ku gurto alaabta aad adigu leedahay.

10. Qashin qubista

waa inaad qashinka guriga ku ridaa haamaha loogu talo galay. Waa inaadan wax qashin ah ku tuurin meel kasta oo hantida ah ama dhismaha ah.

Waa inaad waxyaalaha waaweyn ee qashinka ah ama waxyaalaha la tuurayo uga takhalustaa dariiq munaasib iyo badbaado ah.

11. Gelitaanka

Waa inaad:

Waa inaad u ogolaataa saraakiisha, wakiilada maamulka degmada (council-ka), ama adeegyada waxyaalaha la isticmaalo (tusaale ahaan qandaraaslayaasha adeega gaasta oo samaynaya karmeero badbaado) inay soo galaan hantida dhamaan wakhtiyada macquulka ah (ka dib marka ay ku tusaan kaadh aqoonsi oo rasmi ah):

- si ay u kormeeraan xaaladda dayactir iyo xaaladda ay

hantidu ku sugan tahay;

- si ay hantida ama dabaqa ama dhismaha ay hantidu qaybta ka tahay ugu sameeyaan dayactiro, wax ka bedelid iyo hagaajino;
- si ay u sameeyaan ka fiirsi badbaado, oo ay ku jiraan waxyaalaha gaasta loo isticmaalo;iyo
- ujeedooyinka kale ee maarayn. Kuwaas waxaa ka mid ah laakiin aanay ku koobnayd, samaynta qiimayn-hubinta kiraysiyada, baadhitaan ku samaynta dacwooyinka si sharci daro ah u deganaanta, u wax ka qabashada cabashooyinka, oo ay ku jirto u hawlgelidda lagaga jawaabayo cabasho dhaqamada bulshada dhibka ku ah, colaado deris ka dhexaya.

Maamulka degmada (council-ka) waa inay si joogto ah ka fiirsi ugu sameeyaan waxyaalaha gaasta loo isticmaalo, si ay u hubiyaan inay badbaado yihiin. Waxaa laga yaabaa in dacwad nalagu soo oogo haddii aanad sidan samayn. Waxaad khatar gelin kartaa nafyaal, haddii aadan noo ogolaan in aanu soo galo gurigaaga marka aanu ku weydiisano inaanu soo galno.

- Waxaad heli doontaa ogaysiis ah ugu yaraan 24 saacadood (marka laga reebo wakhtiga xaalad degdeg ah, markaas oo ay tahay inaad na siiso soo gelitaan isla markaas ah).
- Haddii maamulka degmada (council-ka) uu ku weydiistey inay soo galaan gurigaaga, aadna noo diido in aanu soo galo, waxaa laga yaabaa in aanu weydiisano amar maxkamadeed si aanu u soo galo.
- Haddii ay jirto xaalad degdeg ah, tusaale ahaan gaas ama biyo meel ka socdaan/ka soo baxayaan, ama cilad koronto, oo maamulka degmada (council-ka) uu u baahan yahay inuu gurigaaga soo galo islamarkaaba, waxaa laga yaabaa in aanu xoog ku soo galo anagoo aan wax ogaysiis ah ku siin.
- Haddii maamulka degmada (council-ka) ay xoog ku soo galaan, waanu hubin doonaa in gurigaaga looga tago si amaan ah, laakiin waxaa laga yaabaa in aanu kugu soo dalacno kharashka ku baxa in aanu xoog ku soo galo gurigaaga.
- Maamulka degmada (council-ka) waxaa laga yaabaa inay shaqo qabtaan illaa inta wax kasta oo arbushaad ah oo ay sababeen ay macquul tahay marka loo eego xaaladaha. Waxaa laga yaabaa in maamulka degmada (council-ka):

  a). adeegyada u gooyaan si ku meel gaadh ah;

  b). si ku meel gaadh ah u joojiyaan dhamaan xuquuqaha hantida lagu soo gelayo; ama

  c). si joogto ah u weeciyaan xuquuqaha soo gelitaanka (sida wadooyinka ama tuuboyinka biyaha) illaa intii aanay ka ahayn mid uga faa'iido yar hantida. Maamulka degmada (council-ka) marka hore way kuu soo sheegayaan ama kula tashanayaan (ama labadaba) sidii ku haboon.

- Waa inaad u ogolaataa deriska iyo dadka u shaqaynaya inay hantida soo galaan wakhtiyada macquulka ah oo dhan. Waa inay ku siiyaan ogaysiis qoraal ah oo ah ugu yaraan 48 saacadood (marka laga reebo wakhtiga xaalad degdeg), waana inay u yimaadaan oo keliya inay sameeyaan kormeero, dayactiro, wax kabedelid ama hagaajino macquul ah, oo lagu samaynayo hantidooda ama adeegyo hantidooda ah, waa inay maamulka degmada (council-ka) ka haysataan ogolaansho ah inay sidaas sameeyaan, hagaajiyaana wax kasta oo waxyeelo ah oo ay sababaan.

12. Dhaqamada bulshada dhibka ku ah iyo Qashqashaadda

Waxaad mas'uul ka tahay dhaqanka qof kasta (oo ay ku jiraan caruur) oo ku nool hantida ama soo booqday. Tan waxaa ku jira mas'uuliyadda dhaqankooda hantida gudaheeda, dhulka hantida agagaarkeeda ah, meelaha la wadaago (jaranjarada, wiishashka, meelaha guryaha u dhexeeya, hoolalka laga soo galo, barxadaha, xadiiqadaha la wadaago, meelaha lagu ciyaaro iyo meelaha baabuurta la dhigto), iyo dhulka hantida ku hareeraysan.

Adiga, asxaabtaada iyo qaraabadaada, iyo qof kale oo kasta oo hantida ku nool (oo ay ku jiraan caruur) **waa inaanay:**

- samayn wax kasta oo sabab ama laga yaabo inay sababto rabshad ama dhibaato loo gaysto cid walba oo ku sugan agagaarka;
- samayn wax kasta oo faragelin ku ah nabadda, raaxada ama xaalad-wanaagga dadka kale ee agagaarka;
- qashqashaadin qof ku nool agagaarka, sababta qashqashaaduna tahay, midab colaadin, wadaniyad, shahwada qofka, jinsiyadda, diinta ama aaminaada, kala dhantaalnaan, cimri ama wax kaleba;
- qashqashaadin ama ugu hanjabin qashqashaad, isticmaalin ama ku hanjabin isticmaalidda rabshad, ku wajahan qof kasta oo ku nool agagaarka;
- isticmaalin ama ku hanjabin isticmaalidda rabshad, ku wajahan qof kasta oo ku nool hantidaada;
- qashqashaadin ama ugu hanjabin qashqashaad, isticmaalin ama ku hanjabin isticmaalidda rabshad, ku wajahan qof kasta oo shaqaale ama wakiil u ah maamulka degmada (council-ka)
- ku sababin xubin ka mid ah dadka gurigaaga inuu gurigaaga ka tago, sababtoo ah rabshadaha guriga dhexdiisa ka dhaca; ama
- u isticmaalin hantida arimo sharci daro ama anshax xumo ah, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn:

  a). iibinta, isticmaalidda, samaynta ama beeridda daroogo sharci daro ah;

  b). kaydin ama kala deberrid alaabo la soo xaday

  c). hantida gudaheeda ku hayn qoryo/hub sharci daro ama liisan la'aan ah; iyo Dadka jidhkooda iibiya.

Dhaqamada bulshada dhibka ku ah waxaa ku jira, laakiin aanay ku koobnayn:

- dhaqan, baaq ama luuqad midab colaadin ama colaadin dadka noocooda shahwada u leh;

- isticmaalidda ama ku hanjabidda rabsho samayn;
- waxyeelayn iyo qaribid lagu sameeyo hantida;
- ku buufin ama ku qorid waxyaalaha derbiyada lagu qor-qoro;
- muusig dhawaaq dheer ama buuq kale oo dhawaaq dheer;
- muran joogto ah iyo albaabada oo xoog loo xidho;
- qaylo ama qashin ay keento xayawaan rabbaayad ah;
- sarkhaansanaan gef/xumaan wadata;
- qashin meelahaas lagu tuuro;
- dab shidid;
- ku kaxaysi mooto ama moot-u-eeke lagu wadwato meel aan laamiga ahayn;
- dayactir baabuur oo lagu sameeyo jidadka iyo meelaha baabuurta la dhigto ee dhismaha;
- xanibaadda meelaha la wadaago, dariiqyada iyo meelaha kale ee laga soo galo ama laga baxo;
- wax ka tuuridda berendayaasha ama daaqadda; iyo
- quudinta qoolayda, dabagaalayaasha ama shimbiraha aan rabaayadda ahayn.

13. Xayawaanada rabbaayadda ah

Waxaa dhici karta inaad hantidaada ku haynsan karto xayawaanada soo socda ogolaansho la'aan:

- Illaa laba bisadood;
- Hal eey (oo aan ka ahayn nooca lagu qoray liiska faracyada khatarta ah);
- Xayawaan kasta oo yar oo qafis ku jira ama shimbir caadiyan loo haysto rabbaayad ahaan, tusaale, hamsters, guinea pigs, budgies iyo canaries; ama
- Kaluun yar oo qafis-biyood ku jira.

Haddii aad doonayso inaad haysato wax ka badan xayawaanaadkan kor lagu taxay, waa inaad ogolaansho qoraal ah ka haysataa maamulka degmada (council-ka).

Adiga, asxaabtaada iyo qaraabada, iyo qof kale oo ku nool hantida (oo ay ku jiraan caruur), **waa inaanay** u ogolaan in wax xayawaan ah oo lagu hayo ama la keeno hantidaada gudaheeda:

- ku saxaroodo ama kaajo meelaha dadka ka dhexeeya ama jidadka, dariiqyada, meelaha dooga ah ama meelaha lagu ciyaaro ee agagaarka; ama
- sababo rabshado uu u geysto cid kasta oo ku nool, ka shaqaysa ama soo booqata agagaarka.

Haddii xayawaan rabbaayad ah ama xaywaan kale sababo rabshado uu u geysto dad kale, maamulka degmada (council-ka) waxay ku weydiin doonaan inaad xukuntid dhaqanka xayawaankaaga rabbaayadda ah, ama ka kaxaysid hantida.

14. Waxyaalaha Holca

Maaha inaad lahaato ama isticmaasho ama sababto ama qof kale u ogolaato inuu ku isticmaalo:

- wax ah waxyaalaha holca ah hantida gudaheeda, cariishka ama bakhaarka aan ka ahayn kuwa loogu baahan yahay hawlo macquul ah oo la xidhiidha isticmaalka guriga dhexdiiisa; ama
- haamaha ama dhalooyinka gaasta hantida gudaheeda.

15. Baabuur dhigashada

- **Waa inaadan**, ogolaansha qoraal ah oo maamulka degmada (council-ka) bixiyo la'aantiis:
  a). dhigin baabuur, baabuurta la jiido, karafaan ama shay noocaas ah meel kasta oo dhismaha ka mid ah;
  b). ku hayn baabuur, baabuurta la jiido, karafaan ama shay noocaas ah uu leeyahay maamulka degmada (council-ka) : ama
  c). u ogolaan xubin ka tirsan gurigaaga, kaa sii kirayste ama soo booqde inuu sidaa sameeyo.
- Haddii maamulka degmada (council-ka) uu ku siiyo ogolaansho aad ku isticmaasho meel baabuurka la dhigto oo lambar leh oo ku taal dhisme ama geerash uu leeyahay maamulka degmada (council-ka), waa inaad maamulka degmada (council-ka) la gashaa heshiis gooni ah. Heshiiskaan wuxuu dhigayaa faahfaahin shuruudaha isticmaalidda meelaha baabuurta la dhigto ama geerashyada, wuxuuna kuu sheegayaa xaddiga lacagta kirada ee ay tahay inaad bixiso.
- **Maaha inaad** iibiso, kirayso ama bixiso wixii meel baabuurka la dhigto ah ee aanu bixino.
- Maamulka degmada (council-ka) waxaa laga yaabaa inuu qaado, ogaysiis la'aan wixii baabuur, baabuurta la jiido, karafaan ama shay noocaas ah ee la dhigo dhismaha uuna u arko:
  a). Inuu sababayo, ama laga yaabo inuu sababo xayiraad uu ku keeno baabuurta xaaladda degdega ah;
  b). Inuu khatar ku yahay badbaadada qof kasta oo ku nool, ka shaqeeya ama soo booqda dhismaha ama hantidiisa ama hantideeda; ama
  c). looga tegay cidla iyadoo ay jirto xadidaad meel baabuurka la dhigto ah oo la baafiyey.
- Maamulka degmada (council-ka) waxaa laga yaabaa inay soo dalacaan kharashka ku baxa qaadidda baabuur, mas'uulna kama noqon doonaan wixii luma ama waxyeelo soo gaadho, sikastaba sababteedu ha ahaatee.
- **Maaha inaad** baabuur aan liisan lahayn ama baabuurta waaweyn ama baabuurta waaweyn ee ganacsiga la dhigto meel kasta oo ka mid ah dhismaha deegaanka, ama aad sababto ama ogolaato in cidi meelahaas dhigto.
- Maaha inaad mooto ama shay gaadiid oo kale oo noocaas ah ku hayso hantida gudaheeda ama meelaha la wadaago.

16. Xuquuqaha Jidka

waa inaadan sababin, ama ogolaan wax xanibaad ah oo la xidhiidha wax ah xuquuqaha jidka, laamiyada, wadooyinka ama meelaha kale ee la maro ee hantida dhinacyadeeda, meelaha dadka ka dhexeeya ama dhismaha dushiisa.

17. Adeegga Ogaysiisyada

- Sida dariiq kale oo kasta oo uu sharcigu ogol yahay, ogaysiis kasta (laakiin aan ku koobnayn, ogaysiis guri ka bixid ama ogaysiis lagu raadinayo hanti la noqosho), oo maamulka degmadu (council-ka) ay tahay inuu kuu soo diro oo la xidhiidha kiraysiga ama hantida, waxaa loo soo dirayaa si sax ah haddii uu adiga kugu socdo waxaana looga tegayaa hantida ama cinwaankaagii ugu dambeeyey ee la ogaa.
- Haddii aad siisay maamulka degmada (council-ka) ogaysiis qoraal ah oo hoos imaanaya heshiiskan, waa inaad u soo dirtaa ama gacanta uga keentaa xafiiska guryaha ee agagaarka ee lagu muujiyey qoraalkaaga lacagta kirada ama wakiilka maaraynta ee maamulka degmada (council-ka) oo aad ugu geyso/dirto xafiiskiisa weyn.

18. Ogaysiinta Dayactirka

Haddii ay jiraan dayactiro taagan oo hantidu u baahan tahay oo uu hantiilahu mas'uul ka yahay, **waa inaad** hantiilaha siisaa ogaysiis dayactirka ah sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah, adigoo sidaa u samaynaya inaad arinta dayactirka u soo gudbiso wakiilka maaraynta ee maamulka degmada (council-ka)-ka, oo ah Homes for Islington (HFI Direct) ama Lamaane-iskaashiga Hagaajinta ee Islington (Partners for Improvement in Islington) markii ay khusayso.

Lifaaq1

Sababaha laga yaabo in maamulka degmada (council-ka) uu u dalbado inuu gurigaaga dib kaaga qaato

1. Haddii aad bixin weydo lacagta kirada.
2. Haddii aad jebisey shuruudaihii kiraysiga.
3. Adiga ama qof kale oo ku nool hantida uu sababay dhaqamada bulshada dhibka ku ah, qashqashaad, rabsho ama wax laga cadhoodo oo loo geysto deriska/jaaraanka.
4. Labo is-qaba ama labo lamaabe ah oo hanti ugu wada nool nin iyo xaas, oo uu hal lamaane tegay sababo rabsho ama hanjabaad rabsho oo ka timi lamaanaha kale, oo ku wajahan lamaanahaas ama xubin lamaanahaas qoyskiisa ah oo hantida ku nool.
5. Adiga ama qof kale oo hantida ku nool lagu helay dembi ah inuu hantida u isticmaalay arimo anshax la'aan ama sharci daro ah.
6. Xaaladda hantida ama meelaha la wadaago ay sii xumaatay, taas oo ay keentay wax aad adiga ama qof kale oo hantida ku nool sameeyey ama samayn waayey.
7. Aad ka dhaadhicisay maamulka degmada (council-ka) inay kiraysiga guriga ku siiyaan adigoo si kas ah u siiyey warbixino been ah.
8. Maamulka degmada (council-ka) waxay ku siiyeen kiraysi ku meel gaadh ah inta ay socoto shaqada lagu samaynayo deegaankaaga joogtada ah, deegaankaagiina hadda yahay diyaar si aad dib ugu soo guurto.
9. Hantida dadka ayaa ugu badan si wafaqsan xeerarka lagu sheegay Qaybta Part IX ee Sharciga Guryaha ee1985.
10. Maamulka degmada (council-ka) wuxuu doonayaa inuu (wakhti macquul ah gudahiis) ku burburiyo, dib u dhiso ama shaqo ka qabto hantida ama dhismaha ay hantidu ku taal, shaqadaana si macquul ah uma samayn karaan iyagoo aan ku weydiin inaad ka guurto.
11. Hantida ama qayb hantida ka mid ah ayaa ku taal meel ay samayso qorshe la ansixiyey oo dib-u-dhisid, maamulka degmaduna (council-ka) wuxuu doonayaa inuu (wakhti macquul ah gudahiis) kaga takhaluso hantida ama qayb hantida ka mid ah.
12. Hantida waa mid si gaar ah loogu habeeyey qof jidh ahaan kala dhantaalan, qofkii jidh ahaan kala dhantaalaana hadda wixii ka bilawda hantida kuma noola, maamulka degmada (council-ka) wuxuu doonayaa inuu dib uga kireeyo qof jidh ahaan kala dhantaalan.
13. Hantidu waxay qayb ka tahay koox guryo ah oo laga kireeyo dad leh baahiyo gaar ah, waayo waxay leeyihiin hawlo/waxyaalo gaar ah oo dadkaa iyaga ah ka caawinaya dhaqdhaqaaqooda dhowdhow, deegaankana waxaa loogu baahan yahay qof leh baahiyo gaar ah.
14. Hanidu way ka waasacsan tahay ta aad macquul ahaan u baahan tahay, waxaadna kiraysigeeda ugu guulaysatey adigoo xubin ka ah qoys (aan ka ahayn kuwo is qaba ama lamaane bulsho) qof kirayste ahaa oo dhintay. Maamulka degmada (council-ka) waa inay dalbadaan inay hantida dib ula soo noqdaan inta u dhexaysa lix illaa laba iyo toban bilood ka dib markii kiraystihii asalka ahaa dhintay.
15. Kiraysiga waxaa laguugu xilsaaray dariiq kala bedelasho ah, waxaadna heshay lacag lagu siiyey oo la xidhiidha u xilsaaridda.
16. Hantidu waa dhisme inteeda badan loo qorsheeyey ujeedooyin aan ahayn hooy/ku noolaansho ahaan, waxaana loogu baahan yahay inuu galo qof ah shaqaalaha hantiilaha.